

**SI DHIB YAR OO GUUL LEH OO KHUDAARTA LOO BEERTO:  
SIMPLE AND SUCCESSFUL VEGETABLE FARMING:  
SIDA AAD U ILAALIN KARTO CARRDAAD OO CAFIMAAD QABTA  
HOW TO KEEP YOUR SOIL HEALTHY (SOOMAALI)**

M1212 Revised 2007

Carro cafimaad qabta waa muhiim. Waxey siisaa geedaha cunto iyo biyo, iyadoo ka caawisa in ay koraan kabac-dina ay siiso bixitaan heer sare ah oo tacab yar. Carada wanaagsani waxey leedahey midab madoow oo kala daadaneysa marka aad farahaaga ku dareento. Si aad caro cafimaad qabta u hesho, xasuuso sida:

1. Isticmaal carro biyo shub wanaagsan leh
2. Ka ilaali carrada nabaadguurka
3. Ka fogoow carrada qoyan
4. Ku dar waxyaabah nuxurka u keena caradaada
5. Carradaad ha lagu baadho
6. Isticmaal waxa lagugula taliyey ee nafaqeynta

### ***Carrada biyo shubka wanaagsan***

Carro biyo shub wanaagsani hore ayey u qalashaa iyadoo wakhti haboon siisa qoditaanka beerta. Carrada shub wanaagsan leh waxa hore u gaadha hawada ogsajiinka ilaa meelaha xididka, cafimaad ayey xididka siisaa. Waxa ugu haboon koritaanka xididka marka ay dhacdo carro aan laheyn biyo shub xun.

### ***Carrada qoyan ka fogoow***

Haddii carro qoyan la dul maro, caradii hoos bay isgu ururtaa markaa waxey soo tuurtaa hawadii biyuhuna ma dhaafi karaan carada. Markaa waxan la heleyn meel ku filan oo xididkii ka baxo. Carro isku duuban midho wanaagsan ma soo bixiso. Sug inta uu dhulku ka qalalayo inta aanad abuurin.

### ***Ku dar Nafaqayn carradaada***

Nafaqayntu waxay ka koobantahey geedo dhintey, xidido iyo caleemo. Ku darista Nafaqada ee carradu waxey hore u marisaa carrada hawadda neyrojinta iyo iyadoo bixisa dhirtii. Haddi carradu tahey dhooq culus, ku darista nafaqadu waxey ka caawisaa in biyaha carrada ka saarto.

Haddii ay carradu tahey bataax, ku darista nafaqadu waxey caawisaa in carradu biyaha xajisato. Ku darista nafaqayntu waxey u keenta dirxi iyo xasharaad kale oo caawiya in ay dhirta iyo xididkuba noqdaan xoog iyo cafimaad.

### ***Carradaada ha lagu baadho***

Caradaadu waxay u baahantahey macadan caawisa si ay dhirtu u korto. Ku darka nafaqeyntu waxey carrada siisaa macadan iyo nuxur, laakiin carrooyinka qaar baa u baahan cunto badan. Jaamicada Minnesota waxey kuu tijaabin carradaada si loo eego in ay qabto isku jir sax ah oo macadan iyo nuxur leh. Qaali ma aha waana lagaa cawin sidii aad u beeri laheyd dhir iyo midho cafimaad qaba.

Saddexdii sannoba mar waa in muunad laga qaado carrada. Muunada waxa la qaadi karaa wakhti kasta oo sannadka gudihisa ah. Waxa dhib yar in la qaado muunda xiliga Guga iyo Dayrta marka inta badan aad joogto beerta. Waxa lagaa qaadi lacag yar oo ku baxda kharashka tijaabada.

### ***Sidee baad Carradaad u baadhaa***

Soo waca xafiiska fidista ee dagaankaaga si aad uga hesho bac aad ku rido muunada carrada. Waxey ku weydiin doonaan suaalo ku saabsan beertada iyo iyagoo kaaga jawaabi doona suaalahaaga.

Munada carrada u soo ururi sida ugu wanaagsan si ay tijaabadu u shaqeyso. Siyaabaha aad muunada carradaad uga soo qaadi beertaada:

- Ka jar daaqa ama haramaha kale ee carrada dusheeda ah.
- Majarafad yar oo nadiif ah ku qod hog cabiraadu tahey ilaa 7 inch si aad carro yar uga soo saarto.
- Qod in yar oo carro ah qiyaas ahaan ilaa mid nuskii iyo hal inch dhererka ah.
- Haddii carradu ay qoyantahey ama dhooq tahey, ku dul shub kuna baahi warqad nadiif ah si ay u qalasho. Ha ku diirin fooro, ka cuntada lagu diiriyo, ama showlad.

- Carrada yar ku rid bac nadiif ah
- Carro kale ka soo qod meel kale oo ka mid ah beerta kuna dhex rid baaldi
- Isku qas carrad oo dhan ee baaldiga ku jirta
- Ku rid hal pint cabirah oo carro ah baaldiga kuna rid bacda muunada
- Ku qor magacaaga iyo ciwaangaaga iyo taariikhda bacda dusheeda. Ku qor magaca khudaarta aad beertey xiligii hore, iyo khudaarta aad damacsantahey in aad beerto sannadkan
- Usoo dir bacda muunda ciwaankan  
University of Minnesota Soil Testing Laboratory  
135 Crop Research Building  
1903 Hendon Ave.  
St. Paul, MN 55108

Waxad geyn kartaa oo kale xafiiska fidista ee dagaankaaga.

Kabacdi marka carradaada la tijaabiyo, jawaabta ka soo baxda waxa lagu soo dhigi boostada. Jawaabtu waxey kuu sheegeysaa haddii ay carradaadu u baahantahey nuxur. Markaa adiga ayaa go'aan gaadhi kara in aad u baahantahey nuxur siyaado ah iyo in kale.

### ***Ka foojignow nafaqeynta***

Nafaqeyntu waxey waxa yeeli kartaa dhirta haddii si qalad ah loo isticmaalo. Qiyaasta fiican iyo nooca fiican ee nafaqeyntu waxey carradaada ka dhigtaa cafimaad iyo adigoo aan khasaarin nafaqeynta iyo lacagtaba. Isticmaal inta aad u baahantahey oo kaliya. Haddii aanad fahmin tilmaamah, soo wac xafiiska fidista ee dagaankaaga.

### ***Carradaada ku ogow cafimaad qab***

Carradu waa qeybta ugu muhiimsan ee beerta. Haddii aad rabto in aad beerto mudho wanaagsan xagaaga iyo jii-laalka, xasuuso in aad xanaaneyso carradaad sannadka oo dhan.